



# WAXAAD DHIGTAA MEEL AAN LA GAARI KARIN.

Maandooriyaha marijuana wuxuu carruurta ka dhigi karaa kuwo aad u jirin. Waxaad carruurta noloshaada qaybta ka ah ka dhigi kartaa kuwo badbaado iyo caafimaad leh adigoo dhammaan waxyaalaha ka kooban maandooriyaha marijuana ku kaydahaya meel xiran oo aanay carruurta arki karin ama gaari karin.

**Haddii ilmahaagu cuno ama cabo waxyaalo ka samayn maandooriyaha marijuana, waxaad sida ugu dhakhsaha badan u wacdaa Khadka bilaashka ah ee Xarunta Sunta (Poison Center Hotline): 1-800-222-1222.**

Wicidu waa mid lacag la'aan ah adigoo si dhakhso ah taageero u heli doona.

Haddii astaamuhu u muuqdaan kuwo daran, waxaad wacdaa 911 ama waxaad isla markiiba aadaa qolka gargaarka degdega ah.

Astaamaha lagu garto waxaa ka mid noqon kara ilmahaaga oo uu socodka ama fadhiisigu ku adkaado, bilaaba in uu hurdoodo ama neefsashada oo dhibta.